

# DUGSIGA JORDAL

Warbixin loogu talogalay waalidiinta



## Gundhigga waxbarashada ee dugsiga

### Waxa aan aaminsan nahay in ay

- Dadka oo dhami ay wax baran karaan , horumarna samayn karaan
- Wixa aalu abuuri khibrado ardaydu kari karto, si loo arko oo loo xoogiyoo garashada ay ku fiicanyihiin.
- Dadku way ka helaan in hawl adag loo diro
- Dadku waa masuul jecel in uu qayb ka ahaado bulsho wacan

### Dugsiga Jordal waxa uu rabnaa in ardaydu

- Ka qayb qaataan in fasalka iyo dugsiguba uu noqdo goob waxbarasho fiican
- In ay masuuliyad qaadaan oo ay ka mid noqon cidda wax dhibta
- In ay aanay ka soo habsaamin xiisada, yimaadaana iyaga oo diyaar ah
- Si fiican uga shaqeeyaan maadooyinka, xiliga la balamayna ka soo shaqeeyaan casharka
- In ay soo qaataan wixii qalab dugsiga lagu isticmaali lahaa, iyo in ay ilaaliyaan nidaamka

### Dugsiga Jordal waxa uu rabaa in ay waalindiintu

- Ia socdaan oo muujiyaan danaha wanaagsan ee dugsiga iyo hanashada ardayda
- Ka qayb qaataan in uu aydaygu yimaadaan iyagoo diyaar ah.
- Ka qaybgalalaan shirarka waalindiinta iyo shirarka horumarinta ardayda
- Kala xidhiidhaan dugsiga wixii aan u kala cadayn ama suàalo ka qabto

### Macalimiinta dugsiga Jordal waa

- In ay ufududeeyan ardayda sidii ay fasalku u noqon lahaa goob wax barasho wacan
- In ay ku dedaalaan in xidhhii fiican ardayda la yeeshaan
- In ay ardayda shuruudo ku xidhaan, shakhsii ahaan iyo koox ahaanba
- In ay himilooyin gaar ah u sammeeyaan xiisadaha iyo gaadhsiinta ardayda
- In ay siiyaan barid kala duwan iyo mid ku haboon
- In ay ardayda lasiiyo warcelin wacan oo waxtar leh
- In ay gebogebeeyan xiisada, eeg in himiladii la gaadhay, u faafaahi xiisada dambe wax la qabanayo

Hadaad ka warheysid  
waxbarashada  
ilmahaaga,  
waxbarashadiisu way  
wanaagsanaan!

## ARAGTIDA DUGSIGA: QOKA OO DHAN AAYU ARAGNAAD

## **Wada shaqaynta dugsiga iyo guriga**

Wada shaqayta wanaagsan ee u dhexaysa dugsiga iyo guriga waxay u fiican tahay ardayga waxbarashadiisa. Waalidku waa u muhiim waxbarashada ubadkiisa, caruurtada hadaad caawisid oo taakulaysid waxbarashadoodu way u wanaagsanaan.

### **Shirarka waalidiinta**

Shirarka waalidiinta waxa isku barta waalidiinta iyo macalimiinta. Dugsigu waxa uu siyaa waxbixin dugsiga ku saabsan, aqoon is weydaarsi iyo sidii loo dhisi lahaa wada shaqayn wanaagsan oo udhexeysa dugsiga iyo guriga.

Dugsiga Jordal ahaan waxa aanu jecelnay in waalidiintu kasoo qayb galaan shirarka waalidiinta. Hadii turjumaan loo baahanyahay dugsigaa ayaa caawin kara.

### **Wadahadalka horumarinta**

Wadahadalka horumarinta waxa uu dugsigu qabtaa laba jeer sannadkii. Waxa ka soo qayb gala waalidka, ardayga iyo macalimiinta. Waalidiinta wakhti fiican ka hor ayaa la soo ogaysiin shirka.

Wadahadalku waxay kaa caawin xog is weydaarsi iyo sidii horumar loo samayn lahaa. Ardayga waxay ka caawin kartaa in uu isbedel sameeyo ama uu helo caawimaad dheeraad ah. Waxa kasoo baxa wadahadalka waxa uu noqon waxay ardayga, waalidka iyo macalinku isku raacaan. Waa muhiim in waalidku kasoo qayb kalo wadahadalka horumrinta.

### **Casharka**

Waxa muhiim ah in dhamaan ardaydu ay leeyihim nidaam ay racaan marka casharka lag shaqaynayo. Waxa aanu ardayda ku bogaadinaynaa in ay hal saac ku isticmaalaan casharka maalin kasta inta u dhexaysa isniin ila khamiis, laakiin la kordhiyo saacdaha marka imtixaanada la leeyahay. Way fiican tahay in ay waalindiintu xasuusiyaan caruurta in ay casharka ka shaqeeyaan. Ilmahaaga waxaad ku caawin kartaa in qaamuus guriga uso dhigtid. Hadii ardaydu rabaan in casharka laga caawiyo, waxa dugsiga Jordal ka jira caawimo casharada isniin ila khamiis saacada 14:00-16:00. Cilmi baadhish ayaa lagu ogaaday in hawsha ugu muhiimsan ay tahay in waalidku la socdo kana war hayo waxbarashada iyo casharka caruurtooda.

## **Manhajka maadoonjinka**

Maado kastaa oo dugsiga hoose ah waxay leedahay manhaj. Maado kasta waxa loo qaybiyey qaybo muhiim oo ay ku jiraan kartida iyo xirfada asaasiga ah. Dugsiga Jordal waxa laga qiyasqataa xirfadaha maado kasta markuu fasalka 10.aad ardaydu dhameeyso. Dugsigu waxa uu udeegsadaa xirfadahaa qorshaynta iskuul sannadeedka fasalada 8. 9. iyo 10aad. Warbixin qorshayta sannadeedka dugsuga waxaa ka helaysaan bogga Fronter-ka” Warbixin loogu talo galay dhamaan dugsiga Jordal”.

## **Xirfadaha asaasiga ah:**

- Akhrin
- Xisaabin
- isu muujiyaan in qoraal
- Xirfadaha afka
- Xirfadaha digital

## **Imtaxaanada qaranka**

Fasalka 8.aad lio 9.aad ayaa imtixaandanada qaranka gela. Ardayda fasalka 8.aad waxay gelaan akhriska, ingiirisiga iyo xisaabta. Ardayda fasalka 9.aad waxay gelayaan akhriska iyo xisaabta.


Macalimiinta ayaa saxaya imtixaanka. Natijjaduna waxay wax ka tilmaami ardayga maadooyinka laga rabo in uu ku dadaalo. Sababtaa awgeed eyey tahay in laga hadlo imtixaanada qaranka marka waalindka lala shirayo.

## **Xeeladaha baridda**

Qayb kale oo muhiim waa tababarka xeeladaha bariddaka. Xeelado Barashada ayaa ka caawin karta ardayda baridda iyo xasuusta u kobcin lahayeen. Dugsiga Jordal ardayda waxa ay bartaan sida loo isticmaalaan xeelado kala duwan ee baridda, oo loogu talo galay in ay u fududeyaan waxbarshada sida BISON-liiska ama akhriska taariikhda.



Erey/weedh	sharaxaad	Tusaale



Xidhhiid diyagaram

Shaxda

Maap maskaxeed

## Maadooyika waxa ay ardaydu wax ka baranayaan

### Noorweji

Af-noorwejiga ardaydu waa in ay awoodi karaan in ay qori karanaa qoraalo kala duwan, qabtaan badhig afka akhris ah, in ay kala soo bixi karaan wixii macluumad ee qoolada kala duwan ay ka akhristaan.

Weydii caruurta  
"maanta maxaad  
dugsiga kusoo  
baratay?"

### Xisaabta

Xisaabta waxaa jira waxyaabo badan oo ardaydu bartaan oo tabobar ku sammeyaan. Marka heerarka kala duwan ee tababarka, ardaydu waa inay awoodaan inay:

- isku dhufashada kor ka yaqaanaan
- hindisaan xal iyo qiyaasid ka hor inta aanay goaan gaadhin
- arkaan xidhiidhka u dhexeeyaa jajabka, jajab-tobanlaha iyo boqolleyda
- cabbiraadda la taaban karo ee lagu jaangooyey dhererka iyo wareega, mugga, xawaaraha wadada iyo waqtii
- ka shaqynta aljabarada iyo sida loo xallinaayo ee kala duwan
- ka shaqaynta u dhexeeyaa qalabka maalmeedka sida g, km iyo m, m iyo cm, dm<sup>2</sup> cm<sup>2</sup> iyo litir (dm<sup>3</sup>) iyo cm<sup>3</sup>
- bandhiga xogta shaxda iyo diyagaraamka, iyo xisaabinta lambarada celceliska, dhedhexaadka iyo nooca shaxda ah
- soo bandhigaya tibaaxo shaqo sida garaafyo iyo miisaska

### Ingiriisi

Ingiriisiga ardaydu waxay baranayaan ereyo iyo hadalka, naxwaha,qoritaanka, sida jumlada loo dhiso iyo ku dhawaaqa.

- Ardaydu waa inay awooda:
- Diyaargaray badhig afka akhris ah
- Ka qayb kalid wada hadal
- Akhrisid iyo qorid qoraalo kal duwan

Mawduucyada ardaydu baranayaan waa taariikh, juquraafi, bulshada iyo dhaqanka wadamada af-ingiriisi lagaga hadlo. Waxa aanu ardayda ku dhiiri gelinaa in ay buug af-ingiriisi ah akhriyaa lixdii bilood. Buugaagta af-ingiriisiga waxaa laga amaanaysan karaa maktabada dugsiga.

### Ardayda dugsiga dhexe dhigataa waxay fursad u heli karaan in ay maadooyinka dugsiga sare qaadan karaan

Haday ardaydu khibrada ku filan u leeyihin maadooyinkooda, waxay la socon karaan maadooyinka dugsiga sare madooyinka dhowr. Hadaad rabto faafaahin dheerad ah, la xidhiidh la taliyaha dugsiga.

## **Qiimeyn**

Ardaygu waa in uu yaqaan hadafyada waxbarasho iyo waxa xooga la saarayo marka la qiimaynayo khibradooda. Sidaas waxa loo sameeyaa si ay ardaydu u helaan hawlahaa qiimaynta iyo imtixaanada.

## **Karakteerka**

Aasaaska karakteer dejinta dugsiyada dhexe waa qiimayn ardayga khibradiisa laga qiyaas qaadanayo iyadoo loo eegayo manhajka maado kasta.

Dhibcaha karakteerka waa 1 ilaa 6. Halka uu 1 u hooseyo 6 –na u sarayso. Dhibcaha karakteeku waxa uu xambaarsanyahay:

- Karakteerka 1aad - ardaygu maadadaa aad buu hooseysaa.
- Karakteerka 2aad - ardaygu maadadaa wuu ku hooseysaa.
- Karakteerka 3aad – ardaygu madaadaas ku caadi.
- Karakteerka 4aad – ardaygu maadadaa wuu ku fiicantahay.
- Karakteerka 5aad – ardaygu maadadaa aad buu ugu fiicanyahay.
- Karakteerka 6aad – ardaygu maadada si heer sare ah buu u yaqaan

## **Qiimaynta barbarsocodka ah**

Qiimaynta barbarsocota waxbarashada waa qiimayn kasta oo la xidhiidha warbixinta ardayda laga siiyo wax yaabaha ay qabtaan inta fasalka lagu jiro, karateerada ay ka helaan imtaxaanada iyo labada xili ee la siiyo karakteerka guud.

Qiimayn ay adeydu iska dhiibaan waxaa way la socotaa qiimaynta barbarsocodka ah.

## **Qiimaynta kama dambaysta ah**

Qiimaynta kama dambaysta ah waa karakteerka uu ardaygu ku helayo shahaadadiisa.

Qiimayntaa kama dambaysata ahi waa warbixin cadeenaya derejada ardaygu kaga sugan yahay waxbarshada maadooyinka.

## **Karakteerka nidaam iyo anshaxa**

Karakteerka nidaamka iyo anshaxa wanaagga laba jeer ayaa lasiyyaa sannadkii sida karakteerada kale.

Karakteerada nidaam iyo anshaxa waxa ardayda la siiyaa karakteerada la yidhhahdo; Wanaag, fiican iyo laga fiican. Wanaag ayaa ugu wanaagsan laga fiican ugu liita.

## **Nidaam**

Karakteerka nidaamka marka ay maclimiintu dejinayaan waxa ay eegaan in uu ardaygu ilaaliyo sharciga dugsiga, in uu soo qaato bugaagtisa iyo qalabadiisa kale. In aanu ardaygu cashakiisa ka soo shaqeyyo iyo in aanu ardaygu soo habsaamin.

## **Anshaxa**

Marka la dejinayo karakteerka anshaxa ardayda waxa ay macalimiinyu qiimaynayaan sida ardaygu ula dhaqmo ardayda kale, macalinka iyo shaqaalaha dugsiga. Waa in aanu ardaygu maagin ama caayin ardayda kale, waa in aanu si xun ugu jawaabin ama ka dhego adaygin macalinkiisa iyo hab dhaqanka xiliga lagu jiro biririfta. Maqnaanshaha aan dugsiga lala socodsii iyo jaritaanku waa sharci jebin iyo anshax xumo.

## **Qorshaha waxbarashada ardayga u gaar ah (IOP – individuell opplæringsplan)**

Ardayda u baahan qorshe waxbarsho oo u gaar ah waxa la siiyaa qorshe iyo waxbarasho gaar ah. Qorsheha waxaa ku qoran ujeeddooyinka iyo tababarka, sida loo maamuli iyo abaabulan doono.

Qorshaha waxbarashada shaqsiga lagu horumarinayo waxa soo diyaarinya dugsiga iyadoo ku saleysan qiimeyn taas oo adeegyada cilmi nafsiga iyo go'aanada ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee.

### **Jawiga waxbarshada**

Dhamaan ardayda oo dhan waxay xaq u leeyihii in ay jawi wanaagsan oo loo wada dhan yahay wax ku bartaan. Jawi wanaansan ee wax barashada waxa aynu uga jeednaa xaaladaha guud ee dugsigu u saameyn waxbarashada ardayda, caafimaadka iyo ladnaantooda. Si ay taasi u hirgasho waa in dhamaan laga qaybqato. Ardayda, waalidiinta iyo dhamaan shaqaalaha dugsiga waxa dhammaan muhiim u ah horumarinta jawi waxbarasho iyo ammanka oo loo dhan yahay.

### **Xoogsheegasho**

Jawiga waxbarashada wanaagsan waxay qayb weyn ka qaadataa ka hortaga xoogsheegashada. Waalidna ma hubo in caruurtiisa loo xoogsheegto ama ay caruurtoodu ardayda kale u xoogsheegto. Xoogsheegashadu waa dhibaatayn, cay, maag ama gacanqaad la xidhiidha awood aan sinayn, oo dhacdo ahaan soo noqnoqota.

Xoogsheegashadu waxy noqon kartaa

- Hadal- sida dacaayada.
- Bulshada- in dadka la soo dhex gelin.
- Wixiisa – waxa uu leeyahay oo wax loo geysto.
- Maskaxiyan – in loo hanjebo ama lagu amro fal aanu raali ka ahayn.
- Jidh ahaan- in la gacanqaad lagu sameeyo
- Digital ahaan- in websaytyada laga caayo maql iyo muuqaal ahaan

Dugsiga lasoo  
xidhiidh  
hadaad  
maqasho cid  
loo

Caruurta ayaa arka oo la socda waxa dugsiga ka dhacaya. Waxa dhici karta in ay ardayda aan waxba samayn ay arkaan oo guryahooda u wargeliyaan. Waxa dhici karta inta kii dhibanaa sheegin in ay caruurtaadu sheegto. Markaa waalintiintu waa in masuuliyad iska saaran caruurta kale. Hadaad maqasho arday dhibaataysan waa inaad dugsiga la soo xidhiidhaa. Dugsiguna wuu ka hawl geli si xal loo helo.

## Kala xidhiidh

Magaca	Jagada	Tillifoon:	E-mayl
Halvor Holm	Maamule	23 24 23 50	<a href="mailto:halvor.holm@ude.oslo.kommune.no">halvor.holm@ude.oslo.kommune.no</a>
Joachim Hirsch	Ku xigeen	90 94 78 68	<a href="mailto:joachim.hirsch@ude.oslo.kommune.no">joachim.hirsch@ude.oslo.kommune.no</a>
Trine Gustafson	Utviklingsleder	97 12 20 59	<a href="mailto:trine.gustafson@ude.oslo.kommune.no">trine.gustafson@ude.oslo.kommune.no</a>
Sigrun Skrovset	Kormeere dugsiga	90 83 13 08	<a href="mailto:sigrun.skrøvset@ude.oslo.kommune.no">sigrun.skrøvset@ude.oslo.kommune.no</a>
Elin Rogndokken	Sosiallærer	91 73 64 18	<a href="mailto:elin.rogndokken@ude.oslo.kommune.no">elin.rogndokken@ude.oslo.kommune.no</a>
Hanne Ellertsen	Mamulaha xafiiska	23 24 23 51	<a href="mailto:hanne.ellertsen@ude.oslo.kommune.no">hanne.ellertsen@ude.oslo.kommune.no</a>
Therese Thrane	Xafiiska	23 24 23 50	<a href="mailto:therese.thrane@ude.oslo.kommune.no">therese.thrane@ude.oslo.kommune.no</a>
Yassine Erofali	Xafiiska	99 46 10 24	<a href="mailto:yassine.erofali@ude.oslo.kommune.no">yassine.erofali@ude.oslo.kommune.no</a>

## Qaybta caafimaadka dugsiga Jordal:

Magaca:	Jagada	Tilifoon:	Treffetid:
Ellen Engfeldt og Julie Frøystad	Kalkaaliso	23 24 23 90	Isniin, salaasa, arbaca, jimce. s. 08.30-15.30.
	Fisitarabawt	95 45 04 03	Arbaca s.8.30 - 15.00
	Psykolog-ga dugsiga	95 45 04 03	Khamiista s. 9 - 14.30

Ilmahaaga adigaa u  
ah baraha ugu  
horeeya iyo ka ugu  
muhiimad mudan